

XEEBTA SEATTLE EE LOO DHAN YAHAY

Xeebta cusub ee Seattle waxay leedahay meelo dadweyne oo kala duwan oo qurux-badan oo dib ugu xidha magaalada Elliott Bay. Horrumarinnada, oo ku teedsan xeebta laga bilaabo Pioneer Square ilaa Belltown, waxay ka kooban tahay meel cusub oo beerta lagu ciyaaro, xeebo la hagaajiyay, meelo la daawado, farshaxan dadweyne iyo marin heli karo oo la hagaajiyay oo ay ku jiraan dariiqyada kugu xidhaaya dariiqa, waddooyinka dadka lugeynaya iyo baaskiileeyda. Xeebtu waa meel si qurux-badan loo maamulo oo barnaamijaysan, taasoo kor u qaadaysa madadaalada, farshaxanka, waxbarashada, socodka, nasashada iyo xiriir wanaagsan oo lala yeesho xaafadaha ku xeeran. Si aad wax badan uga ogaato Barnaamijka Waterfront Seattle, booqo www.seattle.gov/waterfront.

Waxaad kala xiriiri kartaa Barnaamijka Waterfront Seattle waterfrontseattle@seattle.gov ama (206) 684-7623.



Tagista iyo marista beer biyoodka si ka fudud sidii hore waxaa shalay marinnada geeska, jaranjarooyinka, buundooyinka lugta, marinka baaskiilka iyo wadada dusha ee cusub ee Alaskan Way

Farshaxanka iyo dhaqanku waxay door muhiim ah ka ciyaaraan xeebta. Iyadoo la tixgeliyaa taariikhda goobta, deegaanka, dhaqaalaha iyo bulshooyinka, guddiyada farshaxanka ee joogtada ah waxay gacan ka geystaan abuurista dareen meeled oo martiqaad siinaysa dadka deegaanka iyo booqdayaasha labadaba si ay booqdaan xeebta.



4 XEEBTA PIONEER SQUARE HABITAT



Waxay kugu xirayaan wadada iyagoo sii maraaya Dekadyarada 62 ee dhawaan dib loo dhisay, oo ah buundo socota oo cusub io Marinka beer biyoodka



Hel riwaayado bilaash ah, farshaxan, bandhigyo, ciyaaro, tafaariiq maxalli ah iyo waxyaabo kale oo ay soo abaabuleen Friends of Waterfront Park



U dabaal degista naqshada rasmiga ah, laga bilaabo dib u dhiska Darbiga badda kaasoo taageeraaya in salmon ku u guuro kaabayaasha biyaha dadka ee cagaaran

Ku baashaal laymanka cusub ee baaskiilka ee difaaca leh, kuwaasoo buuxinaaya duleellada ka jira marinka hadda ee baaskiilka, iyo sidoo kale casriyeeyaynta meelaha wadada laga gooyo, kuraasta, farshaxanka bulshada iyo geedo dheeri ah iyo dhul qurxin dhammaan marinka

- Aaga Barnaamijka Beer Biyoodka Seattle
- Mashaariicda la Xiriirta
- ① Railroad Way
- ② Wadada Cusub ee Alaskan Way + Elliott Way
- ③ Hormarinnada wadada Lugta ee Bariga Galbeedka Pioneer Square
- ④ Pioneer Square Xeebka Dalxiiska
- ⑤ Hormarinnada Wadada Columbia Street
- ⑥ Buundada Dadka Lugeynaya ee Marion Street
- ⑦ Darbiga badda ee la dhisay
- ⑧ Xiriiriyaha Seneca Street
- ⑨ Wadooyinka Beerta
- ⑩ Buundadada Lugta ee Union Street
- ⑪ Dekadyarada 58
- ⑫ Wadada Baaskiilka
- ⑬ Balaarinta beer kaluunka Seattle
- ⑭ Beerta la casriyeeyay ee Overlook Walk
- ⑮ Hormarinnada marinka iyo Baaskiilka ee Pike iyo Pine
- ⑯ Dekadyarada 62
- ⑰ Marketfront ga Suuqa Pike Place
- ⑱ Mashruuca Hormarinnada Bell Street
- ⑲ Musqusha dadwaynaha



Kormeer taariikhda hore, tan hadda iyo mustaqbalka ee Seattle ayadoo la adeegsanaayo xiriiro cusub iyo goob ganacsi oo ku yaala Pioneer Square, oo wadata Dekadyarooyin taariikhi ah iyo Suuqa Pike Place.



FAAHFAAHINTA KHARIIDADDA BARNAAMIJKA WATERFRONT SEATTLE

Aagga Barnaamijka [Waterfront Seattle](#) wuxuu inta badan ku fidsan yahay Alaskan Way laga bilaabo South King Street ilaa Virginia Street, oo ku teedsan Elliott Way laga bilaabo Pine Street ilaa Bell Street, oo ku teedsan Elliott Avenue iyo Western Avenue laga bilaabo Blanchard Street ilaa Bell Street, iyo wadada Tareenka laga bilaabo South King Street ilaa Occidental Avenue South. Liiska soo socda ee mashaariicda iyo hantida waxaa lagu muujiyay khariidadda mashruuca iyadoo la raacayo lambarradooda u dhiganta.

1. [Railroad Way](#) wuxuu ku yaal wadada Tareenka ee u dhaxaysa Alaskan Way South ee South King Street iyo Charles Street ee Occidental Avenue South.
2. [Wadada New Alaskan + Elliott Way](#) ee cusub waxay ku taal wadada Alaskan Way inta u dhaxaysa South King Street iyo Virginia Street iyo wadada Elliott Way inta u dhaxaysa Wadada Alaskan (meel u dhow Pine Street) iyo Bell Street waxaana lagu xusay khariidada u dhaxaysa South Jackson Street iyo South Main Street.
3. [Horrumarinnada Dhabaha Dadka Lugeynaya ee Pioneer Square East West](#) waxay ku yaalliin South King Street inta u dhaxaysa Alaskan Way South iyo First Avenue South, South Main Street iyo S Washington Street inta u dhaxaysa Alaskan Way South iyo Second Avenue South, Second Avenue South inta u dhaxaysa South Main Street iyo South Washington Street, iyo Yesler Way inta u dhaxaysa Alaskan Way iyo First Avenue. Waxaa lagu xusay khariidadda u dhaxaysa South Main Street iyo South Washington Street.
4. [Xeebta Pioneer Square Habitat waxay](#) ku taal galbeedka Alaskan Way South meel u dhaxaysa Pier 48 iyo Colman Dock.
5. [Dayactirka waddooyinka Columbia Street](#) waxay ku yaalliin Columbia Street inta u dhaxaysa Alaskan Way iyo First Avenue.
6. [Buundada Dadka Lugeynaya ee Marion Street](#) waxay ku taal dhinaca koonfureed ee Marion Street inta u dhaxaysa Wadada Alaskan iyo First Avenue.
7. [Dib-u-dhiska Darbiga Xeebta](#) wuxuu ku yaal Alaskan Way inta u dhaxaysa Yesler Way iyo Stewart Street waxaana lagu xusay khariidadda u dhow Madison Street.
8. [Seneca Street Connection](#) waxay ku taal wadada Seneca Street inta u dhaxaysa Alaskan Way iyo Western Avenue.
9. [Park Promenade](#) waxay ku taallaa wadada Alaskan Way inta u dhaxaysa South Washington Street iyo Stewart Street waxaana lagu xusay khariidada u dhow University Street.
10. [Buundada Dadka Lugeynaya ee Union Street](#) waxay ku taal wadada Union Street inta u dhaxaysa Alaskan Way iyo Western Avenue.
11. [Dekedda 58](#) waxay ku taal Puget Sound oo u dhow Union Street iyo Alaskan Way.
12. [Ku darista iyo horrumarinta Waddooyinka Baaskiilka](#) ayaa ka jirta inta badan aagga mashruuca ee ku teedsan Wadada Alaskan inta u dhaxaysa South King Street iyo Virginia Street, Elliott Way inta u dhaxaysa Alaskan Way (meel u dhow Pine Street) iyo Bell Street iyo Elliott Avenue inta u dhaxaysa Blanchard Steet iyo Bell Street. Wadada Baaskiilka ayaa lagu xusay khariidadda u dhow Pike Street.
13. Ballaadhinta Seattle Aquarium waa mashruuc la xiriira oo ku yaal galbeedka Alaskan Way inta u dhaxaysa Pike Street iyo Pine Street.
14. [Beerta Wadada Dusha Sare](#) waxay ku taal wadada Alaskan inta u dhaxaysa Suuqa Pike Place ee Stewart Street iyo Pike Street.
15. [Dhismaha Pike Pine Streetscape](#) iyo hagaajinta baaskiiladaha waxay ku yaalliin Pine Street inta u dhaxaysa First Avenue and Melrose Avenue iyo Pike Street inta u dhaxaysa First Avenue iyo Minor Avenue.
16. [Pier 62](#) wuxuu ku yaal Puget Sound oo u dhow Pine Street iyo Alaskan Way.
17. MarketFront ee Suuqa Pike Place waa mashruuc la xiriira oo ku yaal inta u dhaxaysa Elliott Way iyo Western Avenue, meel u dhow Stewart Street.
18. [Mashruuca Horrumarinta Bell Street](#) wuxuu ku yaal wadada Bell Street inta u dhexaysa Elliott Avenue iyo First Avenue.
19. [Musqulaha dadweynaha](#) waxay ku yaalliin galbeedka Alaskan Way oo ka soo horjeeda Pier 58 iyo Union Street.